

Healthy smiles Ontario

Waa maxay Healthy Smiles Ontario program?

Healthy Smiles Ontario waa barnaamij ilkood oo bilaash u ah caruuerta iyo dhalinyarada u xaq leh 17 iyo wixii ka yar.

Laga bilaabo Janaayo 1, 2016, barnaamijyada ay ka midka yihiiin Healthy Smiles Ontario waa:

- Kharshaadka ilko ka samaynta oo laga dhiibo caruuerta ku jirta Cayrta Ontario Works;
- Kharshaadka ilko ka samaynta oo laga dhiibo caruuerta ku jirta Barnaamijka Cuuryaanimada ee Ontario (Disability Support Program);
- Daaweynta ilkaha oo laga dhiibo caruuerta ku jirta Caawimadda Barnaamijka Caruuerta qabta Cuuryaanimada Culus (Assistance for Children with Severe Disabilities Program);
- Caruuerta Ubaahan Barnaamijyo Daaweyn (The Children In Need Of Treatment Program);
- Healthy Smiles Ontario iyo
- Adeegga caafimaadka ilkaha ee laga hortagi karo ooy bixiyaan unugyada caafimaadka dadweynaha ee heer deegaaneed.

Yaa xaq u leh?

Caruuerta iyo Dhalinyarada 17, iyo wixii ka yar ee ay dhici karo inay xaq u leeyihiin haddii:

- Ay degan yihii Ontario; ayna
- Yihii xubin ka mid ah qoys soo buuxiyey shuruuradaha looga baahan yahay qoyska loo arko inuu dakhligoodu hooseeyo.

Fiiro gaar ah: Caruuerta 17, iyo wixii ka yar si toos ah bay ugu xaq leeyihiinsidoo kale si toos ah bay uga diiwaan galsanyihiin Healthy Smiles Ontario marka ay iyaga ama qoyskoodu helaan; Caryta - Ontario Works, Kaalmo Xanaanayn oo ku Meel gaar ah (Temporary Care assistance), Kaalmada Caruuerta qaba Cuuryaanimoojin Culus ama Barnaamijka Kaalmaynta Cuuryaanimada ee Ontario. Caruuerta iyo dhallinyarada haysta caymisyo kale ee ka bixiya daaweynta ilkuhu ma ahan ku dib dambe uga baxsan.

Sidee baan isugu soo qori karaa?

- Gal ontario.ca/healthysmiles;
- ka wac ServiceOntario INFOnline toll-free 1-844-296-6306 TTY, toll-free ama, 1-800-387-5559
- Waxaa kale oo is diiwan gelinta kaa caawin kara waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga.

Gal ontario.ca/healthysmiles si aad u ogaato halka kuguu dhaw Waaxda Caafimaadka Dadweynaha.

Marka laguu ansixiyo is diiwaan gelinta waxaad heli doontaa kaarka daaweynta ilkaha ee Healthy Smiles Ontario. Waa in Kaarka Ilkaha aad u dhiibto ama tusiso kuwa ilkaha kuu daaweynaya mar kasta ood soo boqato si ay uga helaan kharashkooda barnaamijka kaa bixinaya.

Xaggee buu cunugaygu ka heli karaa daaweeyn ilko ooy ku jirto xanaano ilkood oo deg deg ah?

Hadaad dhakhtar ilkood leedahay, la xiriir xaafiskooda si aad u ogaato bal inay ka qayb galaan Healthy Smiles Ontario. Hadaadan lahayn dhakhtar ilkood, la xiriir waaxda deegaankaaga ee caafimaadka dadweynaha si ay kaaga caawiyaan. Gal ontario.ca/healthysmiles si aad u hesho halka kuugu dhaw adeegga waaxda caafimaadka dadweynaha.

Waa maxay adeegyada la bixiyya?

Booqasho joogto ah oo lagu arkayo bixiye adeeg ilkood oo sharci laysan ah u haysta, sida dhakhaatiir ilkood ama nadiifiye ilkood. Waxay kafaalo qaadaan adeegga ilkaha ooy ku jirto firin hubineed, nadiifin, buuxinno, raajooyin, iyo sin-simitaan. Caafimaad ilkood oo deg deg ama dhaqso ahqudheedu waxay ka mid tahay waxyaalaha ay kafaalo qaado Healthy Smiles Ontario.

Muxuu Caafimaadka Afku Muhiim u yahay?

Suuska ilkaha iyo cudurada cirridku waa xanuun badan yihii waxayna keeni karaan infakshan boogeed xun, oo waxyeelleeya koritaanka ilkaha qofka koray- qaan gaarak ah. Xanuunku wixa uu keeni karaa hurdo la'aan, waxyeellayn karaa awoodda wax cunitaan ee cunugga, wuxuuna wax u dhimi karaa awoodda waxbarasho iyo dugsi tegitaan ee cunugga. Caafimaadka ilkaaha oo wanaagsani waxa uu muhiim u yahay meeqaanka nafeed ee cunugaaga, dareenka fiicnaanta iyo caafimaadkooda guud. Ka hortag caafimaad darrada afka intaysan bilaaban!

Faah faahin dheeri ah:

- Booqo ontario.ca/healthysmiles
- Ama wac ServiceOntario INFOnline:

Toll-free: 1-844-296-6306

TTY toll-free: 1-800-387-5559

TTY Toronto keliya: 416-327-4282